Su'aalaha Badanaa la Isweydiiyo (FAQs)
Xog Ku Saabsan Deeqda Aafada ee Dugsiga ee EBT (P-EBT)

ee sanad dugsiyeedka 2022-2023 (Janaayo 4, 2023)

Su'aasha 1: Waa maxay P-EBT?

A: Waa gunnada cuntada ku meel gaarka ah oo ay ogolaatay dawlada federaalka ah si looga caawiyo qoysaska uu saameeyay xirista dugsiyada ee la xariirta COVID-19 iyo ka maqnaanshaha dugsiga.

Su'ssha 2: Qofkee u qalma gunnooyinka P-EBT?

A: Qoysaska reer Vermont ee ay u joogaan ardayda caadiyan hela cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban ee lagu baxsho dugsiga uuna baxsho Barnaamijka Qaran ee Cuntada (fadlan ka fiiri Su'aasha 3 xog ku saabsan cuntooyinka guud ee dugsiga ee sanad dugsiyeedkaan). Dheefaha ayaa lagu heli karaa bil haddii:

- Ardayga uu u maqnaa sabab la ogolaaday oo la xariirta COVID intii lagu jiray bishaas, **iyo**
- dugsiga ardaygu uu u "qalmay" dheefaha P-EBT. *Akhri qorshaha gobalka si aad u barato sida dugsi ugu qalmi karo P-EBT: https://dcf.vermont.gov/esd/P-EBT.*

Su'aasha 3: Ka waran cuntooyinka guud ee dugsiyada Vermont? Tani ma saamaynaysaa u qalmidda P-EBT?

A: Baarlamaanka Vermont ayaa ansixiyay sharci, Xeerka lambarkiisu yahay 151 (2022), kaasoo maalgelin siinaaya cuntooyinka guud ee dugsiyada gobalka ee Vermont dhammaan dugsiyada dawlada iyo dugsiyada madaxa banaan qaarkood. Tani waxay ka dhigan tahay in dugsi kasta oo dawladeed oo ku yaala Vermont iyo qaar kamid ah dugsiyada madaxa banaan ay ka qaybgalayaan Barnaamijka Qaran ee Cuntada Dugsiga ayna isticmaalayaan CEP ama Qodobka 2 sanad dugsiyeedka 2022-2023. Marka dugsi kasta u qalmo (fiiri Su'aasha 2 ee kore), dhammaan ardayda dugsiyadaan dhigta ee dugsiga uga maqnaada arin la xariirta COVID ayaa heli doona dheefaha P-EBT ee maalmaha ay maqnaayeen. Dugsiyada madaxa banaan ee ka qaybgala Barnaamijka Qaran ee Cuntada qoysaskana ka qaada lacagta cuntooyinka dugsiga, ardayda ayaa keliya heli doona dheefta haddii ay u qalmaan cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban.

Su'aasha 4: Maxaa noqon kara sabab la aqbali karo oo la xariirta maqnaansho uu sababay COVID?

J: Maqnaansho la xariira COVID waxaa laga wadaa maqnaansho uu fasaxay dugsigu intii lagu jiray bisha mid uun kamid ah sababaha soo socda awgood:

- aga helay COVID ama lagu arkay astaamaha COVID,
- Loo aqoonsaday inuu la joogay qof qaba caabuqa COVID,
- Leh astaamaha COVID oo qasab ka dhigaaya in degdeg karantiil loo gasho iyo/ama looga baaro qofka COVID, ama
- Xiritaanka fasalka ama dugsiga ee aan la qorshayn, ama u wareegidda hanaanka waxbarashada oonlaynka ah sabab la xariirta COVID, ayna ku jiraan in dadka dugsiga qaar laga helay caabuqa, shaqaalo yari sabab la xariirta COVID, baahida loo qabay raadinta dadka la joogay qofka caabuqa qaba, iwm.
- Si aad u hesho xog faahfaahsan oo ku saabsan maqnaanshaha la xariira COVID, fadlan booqo https://education.vermont.gov/documents/definition-of-covid19-related-absences-for-purposes-of-issuing-pebt-benefits

---

Su'aasha 5: Dugsigeena ayaa loo xiray maalin baraf dhacaayay ama sabab la xariirta tuubo biyood oo dilaacday ama nidaamka kulayliyaha oo jabay. Taasi ma keenaysaa in ardaydu u qalmaa dheefaha P-EBT ee maalmahaas ay maqnaayeen?

J: Maya, keliya dugsiyada loo xiray sababo la xariira COVID ayaa la xisaabinayaa.

Su'aasha 6: Sidee ayaan ku ogaanayaa in qoyskaygu u qalmo?

J: Dugsiga ardaygaaga ayaa go'aamin doona in ardaygaagu u qalmo, ayadoo ku salaysan shuruudaha uu bixinaayo gobalka Vermont. Dugsiga ayaa kulasoo xariiri kara si loo xaqiijiyo inay diiwaanka ku hayaan xogta saxda ah. Fadlan uga jawaab codsigooda. Haddii aad u qalanto, waxaad waraaq ka heli doontaa Department for Children and Families (DCF, Waaxda Carruurta iyo Qoysaska) taasoo kuu sharxaysa qaabka iyo goorta aad helayso gunnada.

Su'aasha 7: Waxaan qaatay kaarka P-EBT sanad dugsiyeedkii hore (2021-22), laakiin hadda ma haysto. Taasi ma dhibay keenaysaa?

J: DCF cDCF ayaa kuusoo diri karta kaar badel ah. Tilmaamaha ayaa lagu cadayn doonaa waraaqaha ogeysiiska gunnada oo soo baxaaya Abriil 2023. Fadlan ilaalso kaarkaaga cusub haddii aad mid hesho. Gunnooyin dheeraad ah ayaa lagu dari karaa kaarka maadaama la bixin doono lacago wax ka badan hal mar sanad dugsiyeedkaan.

Su'aasha 8: Goorma ayaa la bixin doonaa gunnooyinka?

J: Wareegga koobaad ee gunnooyinka *Sibtembar 2022 ilaa Janaayo 2023* waxaa la bixin doonaa Abriil 2023. Gunnooyinka *Febraayo 2023 ilaa Juun 2023* waxaa la qorsheynayaa in la baxsho Agoosto 2023. Fadlan sii wad inaad Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo oo Cusub ka eegto websaydhka DCF si aad u hesho xog dheeri ah oo gaar ah: https://dcf.vermont.gov/esd/P-EBT. Fadlan ogoow in dawlada federaalka ah ay joojin doonto

gunnooyinka P-EBT sanad dugsiyeedkaan haddii xaalada degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha ee COVID-19 ee federaalku dhammaato inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Marka ay sidaas dhacdo, su'aalahaan badanaa la isweydiiyo ayaa isbadeli doona si loogu muujito bisha kama danbaysta ah ee P-EBT la heli doon.

Su'aasha 9: Waa meeqa gunnada P-EBT?

J: Gunnada P-EBT waa $8.18 calaa maalin kasta oo ardaygu u maqnaa sabab la ogol yahay oo la xariirta COVID.

Su'aasha10: Gunnada P-EBT ma isku mid baa ayadoo aan loo eegayn cadadka ilmaha qoyskii u jooga?

J: Cadadka gunnada ee bishii waxay gaar u tahay arday kasta ayadoo lagu salaynaayo inta maalmood ee uu u maqnaa sababta la xariirta COVID ee la ogolaaday bil kasta. Qoysaska ayaa heli doona gunnooyin kaladuwan ayadoo ku xiran tirada maalmaha bil kasta ee ilmo kasta oo qoyska kamid ah uu qalmay P-EBT.

Q11: Masuuliyada waalid ee ardaygayga ayaa u kala qaybsan labo qoys. Qoyskee helaaya gunnada?

J: Gunnada waxaa loo diri doonaa qofka wayn ee uga diiwaan gashan "madaxa qoyska" dugsiga ardayga. Kani wuxuu noqon karaa qofka wayn ee soo gudbiyay codsiga cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee ardayga, ama qofka wayn ee ugu jira nidaamka dugsiga inuu yahay masuulka koobaad. Dugsiyada ayaa la xariiraaya qoysaska bisha Janaayo si loo hubiyo qofka loo qoraayo inuu yahay "madaxa qoyska". Fadlan la xariir dugsiga haddii "madaxa qoyska" loo baahan yahay in la badelo.

Su'aasha 12: Maxaan ku iibsan karaa gunnadaan?

J: Ka fiiri cuntooyinka aad ku iibsan karto gunnadaada P-EBT webseedka USDA: https://www.fns.usda.gov/snap/eligible-food-items.

Su'aasha 13: Xagee ayaan ku adeegsan karaa kaarka P-EBT?

J: Waxaad u adeegsan kartaa inaad uga iibsato cuntooyinka u qalma mid uun ka mid ah xarumaha aqbala 3SquaresVT. Tan waxaa ku jira dukaannada adeegga, suuqyada adeegyada guud, dukaannada xaafadaha, iyo suuqyada beeraleeyda oo badan kuna yaala Vermont. Xog badan ka ogoow webseedka DCF oo ah https://dcf.vermont.gov/benefits/ebt.

Su'aasha 14: Carruur iima dhigato dugsiga. Miyaan helayaa gunnadaan?

J: Gunnadaan waxaa keliya loogu talagalay qoysaska carruurtoodu badanaa ay helaan cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban ee dugsiga uuna baxsho Barnaamijka Qaran ee Cuntada haddana u baahan inay cuntooyinkaas ku cunaan guriga sabab la xariirta inay u

maqan yihiin COVID awgiis iyo sidoo kale ardayda guriga wax ku barata ee buuxsha shuruudaha ku qoran Su'aasha 16.

Su'aasha 15: Gunnadaan ma waxaa heli kara keliya ilmaha dugsiyada dawlada dhigta?

J: Maya. Dugsiyada madaxa banaan qaarkood ayaa ka qaybgala Barnaamijka Qaran ee Cuntada Dugsiga, ilmaha dhigta dugsiyadaasna way u qalmi karaan gunnadaan. Hase yeeshee, dugsiyo badan oo madax banaan ayaan ka qaybgelin Barnaamijka Qaran ee Cuntada Dugsiga, ardayda dhigtana uma qalmaan gunnada.

Su'aasha 16: Cunugayga guriga ayaa wax lagu baraa sanadkaan. Miyaan u qalanaa gunnada?

J: Waxaad u qalmi kartaa gunnada P-EBT ee sanad dugsiyeedkaan ayadoo lagu salaynaayo tusmo cusub oo katimid dawlada federaalka ah. Ardayda soo socda ee guriga wax lagu baro ayaa u qalma gunnada P-EBT sanadkaan:

- arday lagu diiwaan gashay Wakaalada Waxbarashada ee casharada guriga lagu baxsho sanad dugsiyeedka 2022-2023.
- Arday laga diiwaan gashay waxbarashada guriga xili ka danbeeyay Janaayo 27, 2020 (ardayda laga diiwaan gashay waxbarashada guriga kahor Janaayo 27, 2020 ayaan u qalmin)
- haddii aan ardaygu horey u dhigan dugsi ku yaala Vermont si toos ah, sabab la xariirta midkood inuu ku cusub yahay Vermont llagasoo bilaabo Janaayo 2020 ama ardaygu uu ku jiro midkood fasalka xanaanada, fasalka koobaad ama labaad sanad dugsiyeedkaan, waalidka/masuulka ayaa buuxinaaya cadayn sheegaysa in cunugooda guriga wax lagu baraayo sanad dugsiyeedkaan sabab la xariirta COVID.

Su'aasha 17: Qoysaska ka diiwaan gashan waxbarashada guriga ee ay diiwaan gelisay Wakaalada Waxbarashadu ma u baahan yihiin inay codsadaan gunnooyinka P-EBT si ay u helaan sanad dugsiyeedkaan?

J: Maya. AOE iyo DCF ayaa adeegsan doona xogta diiwaan gelinta ee ku jirta galka si loo siiyo gunnooyinka P-EBT ee waxbarashada guriga. Maadaama dhammaan dugsiyada dawlada ee ku yaala Vermont ay baxshaan cuntooyin bilaash ah sida ku cad Qodobka 2 iyo CEP, dhammaan ardayda guriga wax lagu baro ee buuxsha shuruudaha ku oqran Su'aasha 16 ayaa awoodi doona inay helaan gunnada ayagoo aan muujin inay u qalmaan cuntooyinka bilaashka ah iyo kuwa qiimaha jaban ee dugsiga. AOE ayaa la xariiri doonta qoysaska ilmaha guriga wax lagu baro haddii ay jiraan wax su'aalo ah oo la xariira diiwaan

gelinta ama xogta xariirka ee ku jirta galka AOE iyo sidoo kale si ay u buuxshaan cadaymaha qoysaskaas u baahan inay buuxshaan si ay u xaqiijiyaan in cunugooda guriga wax lagu baro sanadkaan sabab la xariira cabsi laga qabo COVID.

Su'aasha 18: Waa meeqa gunnada P-EBT ee ardayda guriga wax lagu baro?

J: Gunnada ardayda guriga wax lagu baro waa $143.15 bil kasta Sibteembar ilaa Juun oo ardaygu ka diiwaan gasahaan waxbarashada guriga ee ay bixiso AOE. Fadlan ogoow in dawlada federaalka ah ay joojin doonto gunnooyinka P-EBT sanad dugsiyeedkaan haddii xaalada degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha ee COVID-19 ee federaalku dhammaato inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Marka ay sidaas dhacdo, su'aalahaan badanaa la isweydiiyo ayaa isbadeli doona si loogu muujito bisha kama danbaysta ah ee P-EBT la heli doon.

Su'aasha 19: Goorma ayaa gunnada P-EBT ee waxbarashada guriga la bixin doonaa?

J: Gunnada waxbarashada guriga ayaa la bixin doonaa halmar bishii si jumlo ah bisha Maayo 2023 waxaana ku jiri doona gunnooyinka Sibteembar ilaa Juun, in xaaladda degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha ee federaalku ay Juun dhamaato ka hor mooyaane. Marka ay sidaas dhacdo, su'aalahaan badanaa la isweydiiyo ayaa isbadeli doona si loogu muujito bisha kama danbaysta ah ee P-EBT la heli doon.

Su'aasha 20: Marka dugsiga la xiro ama cunugaygu uu maqan yahay, waxaan banaanka ka soo qaadanaa cuntada ama dugsiga ayaa cuntooyinka noogusoo dira guriga. Ma qasab baa inaan joojiyo arintaas haddii aan helo gunnada P-EBT? Taasi ma naga hor istaagaysaa u qalmida gunnada?

J: Maya. Ardayda hela cuntooyinka maalmaha ay casharada ku qaataan oonlaynka ayaa wali u qalma gunnada P-EBT. Wali waad heli kartaa cuntooyinkaas waadna u qalmi kartaa gunadaas.

Su'aasha 21: Waxaa ii jooga carruur kale oo ka diiwaan gashan dugsiga ama waxbarashada guriga. Ayaguna ma u qalmaan gunnadaan?

J: Maya. Gunnada waxaa keliya heli kara carruurta ka diiwaan gashan dugsi caadiyan ka qaybgala Barnaamijka Qaran ee Cuntada Dawlada ama ardayda u qalma ee ka diiwaan gashan waxbarashada guriga ee uu baxsho AOE oo buuxinaaya shuruudaha ku qoran Su'ssha 16.

Su'aasha 22: Carruurtayda ayaa dhigta dugsi madax banaan oo kaqaybgala Barnaamijka Qaran ee Cuntada Dugsiga. Carruurtayda ayaa u qalmay cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban markii hore, laakiin xaaladeena ayaa hadda isbadeshay. Ma heli karaa P-EBT?

J: Haddii xaaladaada dhaqaale isbadeshay, waxaan kugu boorinaynaa inaad codsato:

- **3SquaresVT** - Haddii aad hesho gunnada billaha ah, cunugaaga ayaa u qalma cuntada bilaashka loogu baxsho dugsiga wuxuuna heli karaa gunnada P-EBT. Ka fiiri sida loo codsado websaydhka DCF oo ah https://dcf.vermont.gov/benefits/3SquaresVT.
- **Cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban** – codsiga kasoo qaato Dugsiga cunugaaga ama webseedka Wakaaladda Waxbarashada: https://education.vermont.gov/. Codsiyada la ogolaaday ee loo diray dugsigaaga ayaa u suuragelin kara qoyskaaga inuu u qalmo gunnooyinka lagasoo bilaabo Sibteembartii lasoo dhaafay 2022.

Q23: Ka waran haddii aanan doonayn gunnadaan?

J: Ka qaybgalku waa ikhtiyaari. Haddii aad doorato inaadan ka qaybgelin, ama:

- Ha adeegsan gunnooyinka dheeriga ah ee ku jira kaarkaaga SquaresVT EBT. *AMA*
- Qashinka ku rid kaarkaaga gaarka ah ee P-EBT adigoo kala jaraya calaamadda magneedka ah kadibna kaarka qashinka ugu ridaaya si amaan ah. Kaarkaaga ma siin kartid qof kale.

Su'aasha 24: Gunnooyinka PEBT ma dhacayaan haddii aan la isticmaalin?

J: Haa. Gunnooyinka P-EBT ayaa dhacaaya haddii kaarka aan la isticmaalin 274 maalmood gudahood.

Q25: Waxaan qabaa su'aalo dheeri ah. Xagee ayaan ka helaysaa xog dheeri ah?

J: Booqo https://dcf.vermont.gov/esd/P-EBT ama wac 1-800-479-6151, dookha 7, si aad u hesho xog dheeraad ah. Fadlan la xariir dugsiga ardaygaaga haddii aad qabto walaacyo gaar ah oo la xariira u qalmidda ardayga ee cuntooyinka bilaashka ah iyo kuwa qiimaha jaban ama aad doonayso inaad badesho madaxa qoyskaaga ama ciwaanka boostada ee loo adeegsan doono soo dirista kaarka.